



## Tilmaamaha buuxinta Foomka Codsiga Ka dhaafida Caafimaad ee COVID-19 iyo Foomka Codsiga Ka dhaafida Diimeed ee COVID-19

Bixiyayaasha iyo shaqaalaha daryeelka caafimaad ee goobaha daryeelka caafimaad iyo macalimiinta, shaqaalaha dugsiyada, shaqaalaha iyo tabarucayaasha barnaamijyada dugsiga waxa looga baahan yahay inay si buuxda u tallaalan yihiin ama codsadaan ka dhaafida caafimaadka ama diimeedka xiliga Oktoobar 18, 2021. Shuruudaha tallaalka waxaa laga heli karaa Sharciyada Maamulka Oregon ee soo socda:

- [OAR 333-019-1010](#), Shuruudaha Tallaalka COVID-19 ee loogu tallogalay Bixiyayaasha Daryeelka caafimaadka iyo Shaqaalaha Daryeelka caafimaad ee Goobaha Daryeelka caafimaadka
- [OAR 333-019-1030](#), Shuruudaha Talaalka COVID-19 ee Macallimiinta iyo Shaqaalaha Dugsiga

Riix linkiyada sare si aad u akhrido sharciga oo dhan.

Shakhsiyaadka raadinaya ka dhaafida shuruudaha tallaalka COVID-19 waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan oo u gudbiyaan badrooniga codsiga ka dhaafida iyagoo isticmaalaya foomka codsiga ka dhaafida. Waa suurtoagal in badrooniga uu yeelanayo tallaabooyin dheeraad ah oo lagu codsanayo ka dhaafida ama tallaabooyinka dheeraadka ah loo baahanyahay sida la xiriirta ka dhaafida.

### Tilmaamaha lagu buuxinayo codsiga ka dhaafida

- Dajiso ama daabac foomka ee nooca ka dhaafida ([caafimaadka](#) ama [diimeedka](#)) aad codsanaysid.
- Buuxi foomka.
- Haddii aad codsanaysid ka dhaafida caafimaadka, bixiyahaaga daryeelka caafimaadka waa inuu buuxiyaa oo cadeeyaa codsigaaga ka dhaafida sidoo kale.
- Kala hadal badroonigaaga wax ku saabsan shuruudo walboo dheeraad ah ama tallaabooyinka nidaamka dhaxgalka waxay la xiriiri karaan codsiga ka dhaafida.
- Saxiix foomka adigoo isticmaalaya saxiix elektaroonik ah ama saxiixa qalinka.
- U dhiib foomka badroonigaaga si uu dib ugu fiiriyo iyo diiwaan haynta.
  - Fadlan ogow sida la xiriirto codsigaaga ka dhaafida, wuxuu badroonigaaga kaaga baahan karaa ama cida kaloo masuulka ah inaad qaadid tallaabooyin dheeraad ah si ay kaaga illaaliso adiga iyo dadka kale inuu kugu dhaco ama aad

faafiso COVID-19. Goobaha shaqada loogama baahna inay bixiyaan ka dhaafida hoyga haddii sameynta sidaas ay u keeneyso halis toos ah shaqsiga la ogolaaday ama dadka kale ee goobta shaqada ku sugan ama ay ku abuuri karto dhibaato aan loo baahneyn.

- Badroonigaaga waxaa looga baahan yahay inuu hayo dokumentiyada ugu yaraan laba sanno oo uu u dhiibo Maamulka Caafimaadka Oregon markii ay codsadaan.

## **HA U DIRIN FOOMAMKAAGA CODSIGA KA DHAAFIDA MAAMULKA CAAFIMAADKA OREGON.**

**Helitaanka dokumintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacaada ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriiir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673- 2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).